

June 23, 2017

Dugsiga bulshada Pillsbury ee Qaaliga ah,

Magaceygu waa Rey Sirakavit (Sir-uh-cah-vit) waxaan aad ugu faraxsanahay in aan ku soo biro anigoo ah maamulaha cusub ee kooxda dugsiga hoose ee Pillsbury! Waxaan maqlay waxyaabo wanaagsan ee ku saabsan bulshada ayaa sabab ugu weyn keentay inaan kusoo biro jagada hogaanka maaulka, Waxaan rajeynayaa inaan barashadeena noqoto mid sii kororta.

Aragtideyda waxaan ugu baaqayaa dhaqamada wanaagsan, iyo hanashada heerka sare ee horumarka bulshada leh. Waxaa na horyaal shaqo adag, Laakiin waxaan ku kalsoonahay inaan wada shaqeynayno, horumar ayaana ka gaari doonaa. Intii aan ku jiray xirfad aqoontayda waxbarashada, waxaan aqoon dheer u leeyahay qalabeynta macalimiinta, kaaliyayaasha shaqaalaha, iyo maamuleyaasha in ay hirgaliyaan eex-la'aanta, iyo sidii looga jawaabi lahaa dhaqan ahaanand, taas oo horseedayna deegaan waxbarasho nabadgelyo i u leh dhamaan qoomiyadaha heerkay doonaan noqdaane. Waxaan rajeynayaa inaan ku soo biiriyo aragtiyadaas dugsiga hoose ee Pillsbury.

Waxaan ahay hooyo haysata sadex ciyaal oo da'da dugsiga jira, Waxaan aad u jecelahay in aan taageero macalimiinta ka shaqeeya si carruurta wax loo baro baa'biya farqiiga waxbarasho. Markii aan eego caruurteyda —mid waxaa uu qaataa waxbarashda gaarka ah, midna waa ardada hibada leh, midna wuxuu leeyahay caqabadaha dareenka /bulshada. Laakiin, waxay leeyihiin awoodo sare. Iyadoo sidaas ay tahay ayaa hadana waxaa naga saran mas'uuliyad arday kasta oo dhigta dugsiga Pillsbury, intii aan awoodno, in aan ka gudubno qabadaha fikradaha qaldan, gudoonsiino fursadaha..

Howshaan way ka weyn tahay hal macalin, Maamule, ama waalidiinta aysan sameyn Karin kaligood. Iskaashiga xubnaha bulshada oo dhan waa muhiim si looga miro dhaliyo. Maxaa ka wanaagsan in aad kobciso jiilka soo koraaya!

Daacadle,

Ry Sirakavit

Maamulaha Dugsiga Hoose Pillsbury

Rey.Sirakavit@mpls.k12.mn.us

PILLSBURY SCHOOL
EACH STUDENT READY TO LEAD THE FUTURE



Tel 612.668.1530
Fax 612.668.1540

2250 Garfield St. NE.
Minneapolis, MN. 55418

Website: pillsbury.mpls.k12.mn.us



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS
Urban Education. Global Citizens.

